



Qofka muslim ka ah marka lagu su'aalo qabriga dhexdiisa su'aalaha: wuxuu qirayaa shahaadateynka (Ashhadu allaa ilaaha ilaa Allaah wa ash hadu ana Maxamed Rasuulu Allaah

Barraa Binu Caasib-Allaha ka raali ahaadee-wuxuu Rasuulka ka wariyey inuu yiri: "Qofka muslim ka ah marka lagu su'aalo qabriga dhexdiisa su'aalaha: wuxuu qirayaa shahaadateynka (Ashhadu allaa ilaaha ilaa Allaah wa ash hadu ana Maxamed Rasuulu Allaah", waana hadalka Ilaahay yiri: {Ilaahay wuxuu ku sugayaa kuwa iimaanka leh hadalka xaqa ah ee sugan nolosha aduunka iyo mida aakhiroba} [suurada ibraahim: 27].

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Muuminka qabrigaa lagu waydiin su'aalo, labada malag oo wakiil looga dhigay ayaa weydiinaya su`aalaha waana Munkar iyo Nakiir, sida magacdoodu ugu soo arooray axaadiis dhowr ah, Wuxuu qirayaa Ashhadu allaa ilaaha ilaa Allaah wa anna Maxamed Rasuulu Allaah, Nabigu -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- hadalka sugan ee Ilaahay sheegay waa kaas: {Ilaahay ayaa ku sugaya oo waafajinaya kuwa iimaanka leh, hadalka sugan nolosha aduunka iyo tan aakhiroba} [suurada ibraahiim:27].

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/4206>

